


## GAARSIINTA

---

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Mareykanka ee Gobolka Minnesota, waxaa himiladiisa sharciga u sii dheer kaalmada uu u geeysto iyo isdhexgalka uu la sameeyo qeybo badan oo ka tirsan bulshada. Dadaalkaan waxaa ka mid ah sida loo sugo xuquuqda ay leeyahiin dhibaneyaasha dembiyada, horumarinta iyo qeybinta qoraalada ku saabsan sharciyada iyo barnaamijyada federaalka, iyo soo dhaweynta ka hortagga dembiga iyo tababarka hirgelinta sharciga iyo shirarka. Xafiiska wuxuu kaloo la shaqeyaa hirgelinta sharciga, ganacsiga, kooxaha dawladda, waxbarashada, iyo bulshada si loo hortaggo dembiga iyo arrimaha nolosha Minnesota.



**Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Mareykanka  
Gobolka Minnesota  
600 United States Courthouse  
300 South Fourth Street  
Minneapolis, Minnesota 55415**

**Telefoonka: (612) 664-5600**

**Faks: (612) 664-5787**

**[www.usdoj.gov/usao.mn](http://www.usdoj.gov/usao.mn)**

Tilmaanta: Maxkamadda Mareykanka waxay ku taal geeska waddada Fourth Street iyo Third Avenue South ee magaalada hoose Minneapolis. Waddada Third Avenue South waxaa laga heli karaa meel la dhigto baabuurta.

**XAFIISKA XEER  
ILAALIYAHA  
MAREYKANKA**



**GOBOLKA  
MINNESOTA**



TAARIKHDA XAFIISKA  
XEER ILAALIYAHA  
MAREYKANKA WUXUU  
KA SOO BILOWDAY  
1789, MARKII UU  
KONGAREESKA  
GUDBIYAY SHARCIGI  
XUKUNKA, KAASOO  
MADAWEYNAHA KA  
DALBADAY IN UU  
DEGMO KASTA OO KA  
TIRSAN XUKUNKA

FEDERAALKA U MAGACAABO QAREEN MATTALA  
DANAHA MAREYKANKA.

AQALKA SENATEKA WAA IN UU OGOLAADO  
MAGACAABIDA MADAXWEYNAHA KA SMAEYIO  
XEER ILAALIYAHA MAREYKANKA. ISAGA AMA  
IYADA WAXAY U SHAQEYAN SIDA UU RABO  
MADAWEYNAHA MUDDADA AFARTA SANNO.

XEER ILAALIYE KASTA OO MAREYKAN AH IYO  
DHAMAAN KAALIYEYAASHA XEER ILAALIYAHA  
MAREYKANKA WAA IN AY DAGGAN YAHIIIN AY  
MATTALAN. WAXAA LA SHIYAA MUSHAAKKA  
SIDA SHARCIYAGA FARRO, WAXAANA KA  
REEBAN IN AY SHARCIGA SI GAAR AH UGU  
SHAQEEYSTAAN INTA AY FADHIYAAN XAFIISKA.  
QAREENADAAN WAXAY MATTALAN DAWLADDA  
MANA SIIN KARAAN SHAKHSIYAADKA WAANO KU  
SAABSAN SHARCIGA.

MARKA LAGA REEBO DHOWR SHAY, HAWLAHA  
SHARCIGA WAAXDA CADAALADDA  
MAREYKANKA WAXAA FULLIYO 93 QAREEN  
IYO SHAQAALHA MAREYKANKA.

*The Judiciary Act  
of 1789*

## Xafiiska

Gobolka Minnesota waxaa aasaasay  
Kongareeska bishii Maarso 17, 1849. Labo  
maalin kaddib, Henry L. Moss ayaa loo  
magacaabay in uu noqdo Xeer Ilaaliyaha  
kowaad ee Mareykanka.

Iminka, qiyaas ahaan 100 qofood, ay ka mid  
yahiin ku dhawaad 50 Kaaliyeyaasha Xeer  
Ilaaliyaha Mareykanka ayaa ka shaqeeyo  
Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Mareykanka ee  
Gobolka Minnesota. Xafiiska waxaa saldhig u  
ah guriga maxkamadda federaalka ee ku yaala  
magaalada hoose Minneapolis, iyo laanta  
xafiiska waxay ku taalaa St. Paul. Xafiiska  
wuxuu u qeybsan yahay labo qeybood oo  
qaabilsan garta: dembiga iyo maddaniga.

## Qeybta Dembiga

Qeybta Dembiga waa garabka dacwad ku soo  
oogidda Waaxda Cadaaladda Mareykanka  
Minnesota. Waxay hubisaa in dadaalka baarista  
wakaaladaha hirgelinta sharciga la daba galo  
ilaa heerka federaalka.

Qeybta Dembiga waxay ka kooban tahay  
saddax qeyb: Dhaqaalaha, Maandooriyaha,  
iyo Dembiyada Waweyn. Kaaliyeyaasha Xeer  
Ilaaliyaha Mareykanka ee ka tirsan Qeybta  
Dembiga ayaa ka shaqeeya dembi ku oogidda  
dhamaan noocyada dembiyada federaalka, kana  
mid ah argagixisada, musuqmaasuqa  
shirkadaha iyo dadweynaha; khayaanada adag  
ee bangiyada, xawaaladda, iyo khayaanada  
kombuyuterka; xatooyada aqoonsiga;  
faraxumeeynta carruurta ee loo adeegsado  
internetka; ka ganacsiga aadanaha; ka ganacsiga  
mukhadaraadka iyo hubka; dembiga kooxaha  
dagaalama iyo sido kale dembiyada la  
abaabulay; dhaca bangiga; dembiyada  
deegaanka ee federaalka; iyo dembiyada culus  
ee ka dhaca xeroyinka Red Lake iyo Bois  
Forte, kuwasoo ah xeroyinka hoos yimaada  
federaalka.

## Qeybta Madaniga

Qareenada ku jira Qeybta Madaniga waxay  
u shaqeeyaan sida u-dookeyaasha iyo difaaca  
sharciga ee dawladda federaalka xagga  
dacwadaha madaniga ay soo oogto kana soo  
horjeedo Mareykanka Gobolka Minnesota.

Difaaca wuxuu abaaraa dacwadaha dhaqan  
xumada caafimaadka iyo dhimashada sida  
qaldan loo geeysto, muranka shaqada,  
arrimaha socdaalka, iyo waxyaabaha ku lug  
leh taxadiga dastuurka ee lagu sameeyo  
sharciyada ama xeerka u dagsan federaalka.

Dacwadaha xaqiijinta waxay qaabilaan  
khayaanada madaniga, xuquuqda madaniga,  
Sharciga Xaqa Guryaha, Sharciga Mareykanka  
Itaalka Darran, iyo arrimaha deegaanka.  
Shaqada madaniga. Shaqada madaniga  
Xafiiska waxaa kaloo ka mid ah lumista  
hantida, aruurinta deymaha laga qabo  
federaalka iyo ganaaxyada dembiyada,  
guryaha lalla wareego marka la bixin waayo  
deynta, iyo dacwadaha marka ganacsiga kaco.

